



## **Ciidanka Bada ee Midawga Yurub oo Markabka ITS San Giusto dushiisa kula kulmay dad matalayay kaluumaysatada Somaalida iyo odaaysha**

---

Maalintii Isniinta ee 29 Obtoobar 2012, Taliyaha xooga ee Ciidamada bada Midawga Yurub ee Somaliya ee loo yaqaan Hawlgalka Atlanta (EU NAVFOR) Admeral dhexe Enrico Credendino ayaa waxa uu kula kulamay markabka ITS San Giusto dushiisa, kaas oo watay calanka Midawga Yurub EU NAVFOR, koox matalaysay kaluumaysatada deegaanka, odayaasha dhaqanka ee bulshada xeebaha iyo masuuliyiinta deegaanka, ee xeebta waqooyi ee Somaliya meel u dhaw Boosaaso.

Shirkan waxa uu ahaa kii ugu horeeyay ee Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee Somaliya (EU NAVFOR) ay wada shaqayn ku dhex marto dadka metela kaluumaysatada deegaanka iyo bulshooyinka xeebta ee hoos imanaysa Hindisaha Naakhuudayaasha Soomaaliyeed (HNS).

HNS waa hindise ay Barnaamijka Cunada Aduunka iyo Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ay ugu tala galeen in lagu fahmo kaluumaysiga iyo nabadgalyada bada ee kaluumaysatada, sida ay u arkaan dadka deegaanku

HNS waa mashruuc xili-dheer ah kaas oo looga gol leeyahay in lagu dhiso xidhiidh waara oo ku salaysan is-faham iyo is-aaminaad laba dhinac ah taas oo ka dhexaysa Ciidamada Bada ee Midawga Yurub iyo dadka ugu mihiimsan ee matala bulshada kaluumaysatada xeebaha iyo madaxda deegaanka.

Is-dhagaysigii iyo wada hadalkii ay labada dhinac yeesheen waxay isku waydaarsadeen aragtidooda ku aadan la dagaalanka budhcad-badeeda, doorka Ciidamada Bada ee Midawga Yurub iyo dibaatooyinka ay kaluumaysatada deegaanku kala kulmaan bada. Intaa waxaa dheer, ujeedeeyinka HNS waa in kaluumaysatada deegaanka loo xaqiijiyo in ciidanka bada ee jooga mandaqada aanay ahayn halis islamarkaana aanay jirin sabab looga cabsado joogitaanka ciidamada. Sidaas daraadeed, ujeeda HNS waa in kaluumaysatada deegaanka lagu dhiiri-galiyo inay bada ku laabtaan dibna ay u dhidibada ugu taagaan noloshii kaluumaysiga ee Soomaaliya taas oo ah bedelka budhcad-badeednimada.

Dhamaan ka-qayb-galayaashu waxay ku heshiiyeen in budhcad-badeednimada aan lagu joojin karin bada oo kaliya ee ay tahay in xalku ka yimaado dhinaca dhulka. Dhamaadkii, dhaamaan goob-joogayaashu waxay cadeeyeen sida ay u rabaan in kulankani noqdo kii ugu horeeyay ee kulamo xiidhiidha oo mustaqbalka la yeesho.

“Waa markii ugu horaysay ee aan kulano” ayuu yidhi Admeral dhexe Enrico Credendino “dhamaanteena waxaan si niyada u rajaynaynaa inuu noqoto talaabadii ugu horaysay ee wado dheer oo aan si wada jir ah u mari doono”

Intii uu shirku socday waxaa xooga la saaray doorka ergeda dhawaan la aasaasay ee loo yaqaan Ergada Kobicinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor) uu ku yeelan karo dhismaha awoodaha dhinaca bada ee soomaalida.

Ergada Kobicinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor) waa ergo rayid ah kaas oo hoos taga siyaasada isku-dhafka ah ee amaanka iyo difaaca ee loo yaqaan CSDP oo lagu xoojiyay khibrad ciidan. Ujeedeeyinka Ergada Kobicinta Awooda Bad-goboleedka Bariga Afrika (EUCAP Nestor) waa:

- In la xoojiyo sharciga iyo kala dambaynta soomaaliya, iyadoo marka hore diirada la saarayo deegaanada Buntlaandh iyo Soomaalilaandh. Gaar ahaan, hawlgalkani waxuu caawin doonaa horumarinta booliska xeebaha iyo garsoorka.
- In la xoojiyo socodka awoodaha bada ee Jabuuti, Kiiniya iyo Sishelis.

Intaas waxaa dheer, Midawga Yurub waxa uu taageerayaa horumarinta waaxda kaluumaysiga ee soomaaliyeed taas oo hoostagta barnaamika gobolka ee loo yaqaan “SmartFish Programme” (wadarta kharashka lagu bixiyana ay dhantahay 21 milyan oo yuuro) oo lala hirgalinyo Barnaamijka Cunada Aduunka. Midawga Yurub waxaa leeyahay siyaasad aan leexleexad lahayn marka ay timaado kaluumaysiga sharci darada ah waxaana laga codsaday dhamaan maraakiibta wadata calanka Midawga Yurub in ay ku ekaadaan wixii ka baxsan 200 mayl-badeed ee bada Soomaaliya. Sidan iyagana waxaa ku taliyay Atlaanta.